# *Marka Aan La Isla Xisaabtamayn Ubadkaa Ku Silca*

## *Horizon Institute Waxa ay ku Baaqaysaa Baadhis Madax-Bannaan oo ku Saabsan Kiiska Kufsiga Xarrunta Agoomaha Hargeysa*

**Hargeysa, Somaliland**

**25 June 2020**

Sida uu u soo shaac-baxay kufsiga la aaminsan yahay in loo gaystay gabadha yar ee Xarrunta Agoomaha Hargeysa ku jirta, taas oo kufsiga kadib xaamilo noqotay. Arintani waa mid soo jiidatay indhaha dadweynaha. *Hay'adda Horizon Institute* oo si aad ah uga hawlgashay kiiskani waxa ay soo dhawaynaysaa doodda dadweynaha ee ka dhalatay warbixintii Telefishanka *Horn Cable* baahisay 20-kii June 2020.

Duruufaha ayaa ogolaanaya in dadweynuhu si dhaw ugu kuur-galaan si ay toosh ka ugu iftiimiyaan saamaynta qofka, qoyska iyo hay'adaha marka aan isla xisaabtan ka jirin laamihii dawladda. Qisada ku dhacday Cawo iyo qoyskeeda, iyo carruurta kale ee ku eedaysan kufsiga iyaga oo aan la marin hannaankii sharciga waafaqsanaa, waa nidaam caddaalad-darro is huwan oo aad looga xumaado, sharcigii iyo Dastuurkii Somaliland oo lagu xadgudbay, masuuliyaddii oo la gabay, awooddii oo lagu tagri falay iyo mugdi ku jira isla xisaabtankii hay'ado badan oo xukuumadda ka tirsan.

*Hay'adda Horizon* waxa ay ku baaqaysaa baadhis madax-bannaan oo ku saabsan kiiskan. Gabadhan yar ee udub-dhexaadka u ah arrintan, taas oo karaamadeedii iyo caafimaadkeedi ay dayaceen Xarrunta Agoomuhu, waxa ay mudan tahay in ay hesho caddaalad dhibtii ay u soo adkaysatay. Sidoo kale wiilasha dhallinyarada ah ee ku noolaa Xarrunta Agoomaha ee la soo xidhay kadib markii baadhis degdeg ah la sameeyey waxa ay u baahan yihiin xuquuqdooda in la dhawro. Isku soo duuboo, cidda dayacday caruurtani waa dadkii waayeelka ahaa. Waa waayeelkii kuwa aan u fidin daryeelkii iyo dhawristii ay xaqa u lahaayeen. Waa dadka masuuliyiinta ah cidda ay tahay in lagu canaanto kufsiga lagula kacay gabadha yar iyo xadhiga wiilasha lixda ah ee lagu hayo Xarrunta CID-da. Tani maaha wax ay u qalmaan in lagula kaco ubadkeenu.

## *Sidee ayay Hay'adda Horizon Kiiskan u soo Gashay*

*Horizon* billawgii waxa ay ogaatay kiiskan 6-dii May 2020 markii lanaga soo codsaday in aanu taageero sharci u fidino gabadh yar oo lagu magacaabo Ifraax oo saldhigga Booliska Koodbuur, Hargeysa ku xidhnayd ilaa 25-kii April 2020. Ifraax waxa ay ka ogaatay habaryarteed in gabadh yar oo ay taqaano oo ku jirta Xarrunta Agoomaha oo la yidhaa Cawo in ay u sheegtay in ay dugsiga Xarrunta Agoomaha ku kufsadeen tiro rag ah isla markaana ay xaamilo tahay. Murankii dhex maray Agaasimaha Xarrunta Agoomaha, Caasha Maxamuud Qaalib iyo qoyska Ifraax waxa ka dhashay xurguf halkaas oo Ifraax lagu eedeeyey in ay jabisay muraayadda gaadhiga agaasimaha. Billawgii waxa lagu soo xidhay in ay jabisay muraayadda gaadhiga balse markii danbe waxa lagu eedeeyey in ay arrinka kufsiga la xidhiidha ku baahisay baraha bulshada. Waxa lagu hayey saldhigga booliska 11 maalmod waxana la sii daayey 6-dii May markii lagu waayey caddeyn in ay jabisay muraayadda iyo in ay arinta Cawo baraha bulshadu kuwada xidhiidho ku baahisay.

Ifraax Aabbaheed, Mawliid ayaa la soo xidhay 6-dii May 2020, isaga oo sidoo kale lagu eedeeyey in uu ka hadlay kufsiga iyo in uu jabiyey muraayadda gaadhiga Agaasimaha Xarrunta Agoomaha. Waxa lagu hayey saldhigga booliska ee Koodbuur 18 maalmood. Waxa lagu waayey danbigii ahaa magac-dilista balse waxa ay Maxkamadda Degmada Hargeysa 22-kii May ku xukuntay 1 sanno oo xadhig ah in uu jabiyey muraayadda. Qoyskiisa ayaa iibsaday xukunkii oo loo baddelay ganaax waxana la sii daayey 28-kii May 2020.

Waqtigaas, Cawo waxa ay xaamilo 6 billood ah. Balse, Xarrunta agoomuhu may ogeysiin qoyskeeda. Sida uu sheegay Cawo Aabbaheed, Xariir Raage Cabdille, waxa uu waayaha inantiisa dabayaaqadii bishii April. Waa qoys danyar ah, isaga iyo xaaskiisuba waxa soo waajahay dhibaato caafimaad oo aad u culus. Xariir waxa uu sheegay in uu ku khasbanaaday in uu tago Xarrunta Agoomaha si uu u soo qaato Cawo, walaasheed oo ka yar iyo wiil uu dhalay.

3-dii June, *Horizon* waxa loo sheegay in Xariir inantiisa yar, Hodan, oo 9 ama 10 jir ah laga kaxeeyey xarrunta agoomaha, iyada oo ayna ogolaan ama aan lala socodsiin qoyskeeda, lana geeyey guri gaar ah.

Usbuucyadii ka danbeeyey, *Horizon* waxa ay gacan ka siisay Xariir Raage sidii uu ugu tagi lahaa carruurtiisa ku jirta Xarrunta Agoomaha iyo si aanu ugu dhiiri-gelino Laanta Danbi Baadhista (CID) in ay sameeyaan baadhis dhab ah, aan dhana u xaglinayn oo ku saabsan kufsiga iyo waayaha uurka ee Cawo. Sidoo kale waxa aanu ka caawinay in uu raadiyo sidii ay arrinta u soo geli lahaayeen Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska, oo ay hoos timaado Xarrunta Agoomuhu, iyo Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska (MESAF) oo leh waax u qaabilsan Dhawrista Caruurta.

## *Raadinta Caddaaladda: Qoyska Cawo Waxa ay Codsi u Direen Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha*

9-kii May 2020, saddex qof oo Cawo xagga hooyadeed ay ka walaalo yihiin, ayaa warqad u qoray Xafiiska Gobolka Maroodi-jeex ee Xeer-ilaaliyaha Guud, oo ay Hargeysi hoos timaado. Warqaddooda, Farxaan Abiib Habane, Filsan Abiib Habane iyo Faysa Abiib Habane waxa ay ku xuseen in walaashood, Cawo oo 14 jir ah kuna nool Xarrunta Agoomaha Hargeysa, la kufsaday isla markaana ay tahay xaamilo 6 billood ah. Waxa ay ku dareen: "Waa la qariyey arrinta si aan cidna u ogaan, illaa haddana qof loo soo qabtay ma jiro. Maamulka Xarrunta Agoomuhu marna waxa ay leeyihiin weli baadhistii ayaanu wadnaa, marna waxa ay leeyihiin qof ayaanu u guurinaynaa. Sidoo kale waxa ay u geeyeen dhakhtar si uurka looga soo xaadho. Balse dhakhaatiirtu way diideen, iyaga oo ku saleeyey in aan ogolaansho laga haysan waalidkeed ama qaraabadeed si hawshaa loo sameeyo."

Walaalaheed waxa ay ka codsadeen Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud in : (1) uu baadho cabashadan si caddaaladda loo soo hor joojiyo kuwii falkaa geystay. (2) iyaga, oo ah ehelkii, loo ogolaado in ay booqdaan si ay ula socdaan xaaladdeeda caafimaad "iyada oo la ogsoon yahay duruufta adag ee ay ku jirto." (3) in loo yeedho maxkamaddana la horkeeno Maamulka Xarrunta Agoomaha maadaama ay masuuliyadda ugu weyn saaran tahay.

Mawliid Cabdi Muuse, Madaxa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Gobolka Maroodi-jeex ayaa u gudbiyey warqaddaa Hogaanka CID-da isaga oo ku amraya "in uu eego cabashadaas haddii ay tahay mid jirta oo dhab ah." Ehelka Cawo oo ay la socdaan shaqaalaha *Horizon,* ayaa isla maallintii, bisha 9-keedii gaadhsiiyey warqaddii Hogaanka CID-da. Wuu guddoomay waxaanu yidhi waxaan u xilsaaray baadhe, kana soo war doonaan laba maalmood ka dib. Waxa ay Aabaha dhalay dhibanta iyo shaqaalaha Horizon dib ugu soo noqdeen CID, 12-kii May isagoo u sheegay in uu Xeer-ilaaliye Mawliid Cabdi Muuse ka codsaday in ay joojiyaan cabashadaas maadaama "dhibanihii xaamilo tahay arrintiina ay hadda tahay mid madani ah." Sidaa awgeed, wuxu u sheegay Hogaanka CID du inay cabashadaa halkaa ku joojiyeen.

Waxa mar labaad, 13-kii May, Cawo Aabbaheed warqad u qoray xeer-ilaaliyaha, isaga oo hoosta ka xarriiqaya qodobadii ay soo jeediyeen Cawo walaalaheed kana codsanaya Xafiiska Gobolka ee Xeer-ilaaliyaha Guud in: (1) Xafiiska Xeer Ilaalinta Gobolku amarto Hogaanka Baadhista Dacwadaha ee CID inuu baadhis rasmiya ku sameeyo kiiskan si cadaalada loo helo. (2) In ka waalid ahaan la ii ogolaado booqashada inantayda, xaaladdeedana uga warhayo maadaama xaalad adag ay ku jirto." (3) Waxaan codsanayaa inay Cawo hesho caddaalad "oo la horkeeno sharciga kuwii falkaasi foosha xun gaystay,"

Sidoo kale 13-kii, Horizon waxa ay la socodsiisay xeer-ilaaliyaha go'aankii Hogaanka CID-du uu ku joojiyey cabashadii uu xeer-ilaaliyaha laftigiisu u gudbiyey. Sida uu xusay xeer-ilaaliyuhu, wax xidhiidh ah lamuu samayn Hogaanka CID-da ka dib markii uu 9-kii bisha u gudbiyey cabashada. Xeer-ilaaliyuhu waxa uu telefoon kala hadlay Hogaanka CID-da, isaga oo mar kale ku amraya " in uu eego cabashadaas haddii ay tahay mid jirta oo dhab ah." Warqadda uu qoray Xariir isla maallintaas ayaa la gaadhsiiyey Hogaanka CID-da

isaga oo guddoomay xusayna in uu u magacaabayo baadhe si uu sida ugu dhakhsaha badan u billaabo baadhista.

## *CID-Du: May Danaynayn in Xaqiiqada laga Gun-gaadho*

Hab-dhaqankii CID-da ee kiiskan waxa ka dhalanaysa su'aasha ah xirfaddooda, dhex-dhexaadnimadooda, u hogaansanaantooda sarreynta sharciga iyo in ay danaynayaan in xaqiiqada laga gun-gaadho. Iyada oo ay dhawr jeer uu Cawo Aabbaheed oo ay la socdaan shaqaalaha *Horizon u tageen,* wax tallaabo ah oo la qaaday ma jirto. Hogaanka CID-da, Faysal Xiis Cilmi, waxa uu sheegay in wiil yar "uu qirtay" isla markaa aan loo baahnayn baadhis. Kadib markii masuul ay qaraabo yihiin gabadha yari soo galay, Hogaanka CID-du waxa uu magacaabay baadhe. CID-du waxa ay magacaabeen baadhe kale, laba usbuuc kadib isaga oo ballan qaad sameeyey balse wax uu qabtay aanay jirin.

4-tii June, *Horizon* warqad cabasho oo rasmi ah ayay u gudbisay Taliyaha Booliska, Sareeye Guuto Maxamed Aaden Saqadhi, oo ku saabsan sida joogtada ah ee uu Hogaanka CID-du ugu guul-darraystay in saraakiishiisu sameeyeen baadhis lagu kalsoonaan karo.

7-dii June, saddex maalmood kadib, Hogaanka CID-du waxa uu warqad u gudbiyey Maxkamadda Gobolka Hargeysa iyo Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud. Waxa uu ka codsaday ogolaanshaha in uu 5 wiil oo carruur ah oo ka tirsan Xarrunta Agoomaha garsuge ahaan ugu hayo Xarrunta CID-da 7 maalmood, inta ay socoto baadhistu. Waxa la soo xidhay 6-dii June. Warqaddan codsiga ee qoran, Hogaanka CID-du waxa uu xusay in da'da wiilashu ay tahay 12 jir, 13, 13, 14 iyo 15 jir.

14-kii June, *Horizon* waxa ay u qortay warqad Hogaanka CID-da in xadhiga 4-ta wiil ee da'doodu u dhaxayso 12 iyo 14 jir, uu ahaa mid sharci-darro ah kuna xadgudbay Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta ee Somaliland maadaama ay ka yaryihiin da'dii masuuliyadda ciqaabta. Hogaanka CID-du telefoon ayuu ugu soo jawaabay shaqaale ka tirsan *Horizon* isaga oo ugu hanjabay in uu xidhi doono.

Laba maalmood kadib, 16-kii June, *Horizon* waxa ay ogaatay in da'da wiilasha la badelay iyada oo lagu saleeyey baadhitaan caafimaad oo degdega ah oo laga sameeyey Cisbitaalka Guud ee Hargeysi. Dhamaantoodna hadda way ka weyn yihiin da'da 15 jirka.

17 June, *Horizon* waxa ay magacawday qareen madax-bannaan si uu u matalo wiilasha xidhan. Markii uu qareenku ka codsaday CID-da ogolaanshaha in uu la kulmo, waa loo diiday, si ka soo horjeedda dhawrista xuquuqda maxbuuska ee ku xusan Dastuurka Somaliland iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta, gaar ahaan carruurtu in ay helaan lana xidhiidhaan qareen tallo-bixin bilaash ah u fidiya.

18-kii June, *Horizon* waxa ay u gudbisay warqad Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka Hargeysa, Cabdi Qawdhan Cabdi, kuna xustay in ay rumaysan yihiin in da'da wiilasha, ku noolaa Xarrunta Agoomaha kuwaas oo aan haysan qoys u hadla, la baddelay kadib markii aanu cabasho ka gudbinay. Kulan uu la yeeshay wakiilka *Horizon* iyo qareenka,

Gudoomiyuhu waxa uu xusay in uu telefoon kula hadlay Agaasimaha Xarrunta Agoomaha kana codsaday in ay wiilasha dib ugu celiso Xarrunta iyaga oo dammaanad lagu sii deynayo inta da'dooda la xaqiijinayo. Balse, Agaasimuhu kamay soo jawaabin wiilashiina waxa lagu celiyey Xarruntii CID-da.

Iyada oo arrintaa hore jirto, waa isla CID-dii kuwa hadda go'aaminaya baadhista kiiskan, masiirka wiilashaaa iyo in ay Cawo iyo qoyskeedu heli doonaan caddaalad.

## *Maqnaanshaha Kormeerka iyo Warwarkiisa: Wasaaradaha Ku Guul-darraystay in ay Tallaabo Qaadaan*

Wasaaradda ka masuulka ah Xarrunta Agoomuhu waa Wasaaradda Waxbarashada & Sayniska. Sababtaa awgeed, Xariir Raage waxa uu codsi u gudbiyey Wasaaradda 11-kii May 2020. Warqad cinwaankeedu ahaa "Cabasho ka Dhan ah Maamulka Xarrunta Agoomaha Hargeysa," Xariir waxa uu u sharraxay kufsiga, uurka 6-da billood, in lagu guul-darraysan in lala socodsiiyo duruufta inantiisa ama in la aqoonsado lana soo xidho kuwii geystay falkaas iyo wax uu ugu yeedhay isku day qarin arrinta ku saabsan. Waxa uu ka codsaday Wasaaradda in: (1) Ay u yeedhaan Maamulka Xarrunta Agoomaha "maadaama ay hayaan masuuliyadda koowaad ee danbiga dhacay iyo in su'aalo ay ka weydiiyaan falkaas." (2) In waalid ahaan, loo ogolaado in uu booqdo si uu ugu kuur-galo caafimaadka inantiisa "maadaama ay da'deedu yartahay duruuf qalafsan oo dhanka caafimaadka ahina soo waajahay."

Wasaaradda Waxbarashada & Saynisku illaa 11-kii May, may qaadin wax tallaabo ah. Shaqaalaha *Horizon* ayaa u raacay Xariir Wasaaradda 14-kii May. Waxa aanu booqanay Wasaaradda 5 jeer oo isku xigta anaga oo la kulanay masuuliyiin kala duwan una gudbinay dhokumentiyadii ay u baahnaayeen. 16-kii May, waxa la noo sheegay in cabashadii loo gudbiyey Wasiirka iyo Agaasimaha Guud kaas oo sheegay in uu magacaabi doono guddi. 20-kii, waxa la noo sheegay in guddidii la sameeyey balse ayna weli kulmin. 28-kii, waxa aanu ogaanay in guddidii wax natiijo ah ayna soo saarin lana kala diray. 28-kii May iyo 8-dii June, mar kale ayaanu booqanay balse kulankii Wasiirka iyo Agaasimaha ee la noo ballan qaaday may suurtoobin, lanoomana sheegin wax tallaabo ah oo ay Wasaaraddu qaaday.

14-kii May, Xariir sidoo kale waxa uu warqad u gudbiyey Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ay ku qorantahay intii uu hore ugu gudbiyey Wasaaradda Waxbrashada & Sayniska, balse ay jirto qoraalkaa hore in ay ku kala duwan yihiin. Warqadda uu u qoray MESAF, waxa uu ku xusay: "Dhibanaha iyo Maamulku waxa ay ii sheegeen in tirada falka geysatay ay yihiin 8 rag ah. Sidoo kale, in ay xaamilo noqotay, Maamulka Xarruntuna qariyeen fal-danbiyeedkaa si aan cidna u ogaan, cidna lagala xisaabtamin." Warqadda uu u qoray MESAF, Xariir waxa uu sidoo kale ku celiyey qodobadii uu hore ugu sheegay Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud, gaar ahaan "Maamulka Xarrunta Agoomuhu marna waxa ay leeyihiin weli baadhistii ayaanu wadnaa, marna waxa ay leeyihiin qof ayaanu u guurinaynaa. Iyo in Maamulka Dugsigu isku dayeen in ay soo xaadhaan uurka balse dhakhaatiirtu ka diiday iyaga oo sheegay in ayna haysan ogolaanshaha waalidka ama qaraabada."

In kasta oo MESAF ayna lahayn awoodda tooska ah ee masuuliyadda Xarrunta Agoomaha, waxa ay leeyihiin waax u qaabilsan Dhawrista Caruurta. Sababtaa awgeed, *Horizon* waxa ay u raacday Xariir 14-kii May si uu ugu gudbiyo cabashadiisa, sidoo kale waxa ay booqdeen 17-kii May iyo 8-dii June si ay u hubiyaan in wax tallaabo ah la qaaday. Xidhiidhkii ugu danbeeyey wuxuu ahaa mid telefoon ah 14-kii June.

## *Maamulka Xarunta Agoomuhu waxay Gabeen Masuuliyadii ka Saarnayd Caruurtii ay Gacanta ku Hayeen ee ay Samaysay Arintani*

Waxa soo baxaya xaqiiqooyinka aadka u qallafsan ee ku saabsan waayaha iyo dhibta la soo deristay Cawo iyo qoyskeeda, iyo wiilasha hadda ku xidhan CID-da. Wiilashani ma haysaan qareen, qaraabo ama hay'ado xuquuqal insaan waxana lagu soo xidhay duruuf adag oo xadgudub ku ah xuquuqdooda sharci iyo xuquuqdooda dastuuriga ah. Xaqiiqooyinka la ogsoon yahay sidoo kale waxa ka dhalanaya su'aalo la iska weydiinayo Maamulka Xarrunta Agoomaha kuwaas oo muujiyey in ay ku fashilmeen in ay u fudiyaan daryeel binu-aadamtinimo iyo jawi habboon caruurtaa ay masuulka ka yihiin, waxaana cad in ayna jirin cid la xisaabtamaysaa.

Waraysi ay la yeesheen laba TV 22-kii June, Agaasimaha Xarrunta Agoomuhu, Caasha Maxamuud Qaalib, waxa ay isku dayaysay in ay daadefayso dhaliisha, iyo dooddii ka dhalatay baraha bulshada, ee uu sababay barnaamijkii *Horn Cable* ay baahisay 20-kii June halkaas oo uu Xariir u soo jeediyey eedo ka dhan ah Xarrunta Agoomaha. Wakiil ka socda *Horizon* ayaa sidoo kale lagu waraystay wuxuuna si tifaftiran u sharraxay tallaabooyinkii khaldanaa ee baadhista la xidhiidhay illaa maallintaa.

Nasiib-darro, Agaasimuhu may bixin wax jawaabo ah oo ku saabsan su'aalihii muhiimka ahaa ee uu soo jeediyey barnaamijku. May sheegin waxa ay qabanayso si ay u xaqiijiso bad-qabka Cawo. May sheegin waxa ay ka qabanayso si ay u fudaydiso wadashaqaynta baadhista. May sheegin waxa ay Xarrunta Agoomuhu samaynayso si ay taageero ugu fidiyaan wiilasha ku xidhan CID-da si ayna ugu daranyoon goobtaas. Balse, waxa ay isku dayday in ay dareenka jeediso iyada oo ku andacoonaysa in arrinta la siyaasadeeyey oo uu ka faa'iideysanyo xisbiga mucaaradka ee Waddani, iyo dadka leh danta diciifka ah ee qabiilka. Waxa sidoo kale ay ku hanjabtay in ay qaadayso tallaabo-sharci, oo ka dhan ah wakiilka *Horizon,* waxayna si kalsooni leh ugu celcelisay baadhistii qalloocnayd ee ay sameeyeen CID-du.

Waa wax dhici karta, ama aan dhici karin in ay jiraan dad uga faa'iideysanaya kiiskan sabab qabiil ama siyaasadeed. Taasi maaha arrinta muhiimka ah. Muhiimaddu waa Nolosha ubadkaa tallaabooyinkaasi noloshooda burburinayaan, ama mustaqbalkooda ku waayaya tallaabo ay qaadi waayeen Maamulka Xarrunta Agoomuhu, iyo Nolosha qoyskooda. Sidaa awgeed, Agaasimaha waxa saaran waajib, uu farayo xilka waalidnmo ee ay u hayso carruurtaa ay masuulka ka tahay, in ay ka jawaabto su'aalahan soo socda.

- Waa maxay sababta ay Xarrunta Agoomuhu ugu soo sheegi waayeen booliska kiiska kufsiga?
- Waa maxay sababta Maamulku ugu sheegi waayeen Cawo Aabbaheed in inantiisa yar la kufsaday xaamilona ay tahay?
- Waa maxay waxa ay Maamulku sameeyeen 6-dii billood ee ka horreeyey intii aan uurka Cawo soo shaac-bixin si ay u xaqiijiyeen kuwii falkaa geystay?
- Sida ay Cawo sheegtay, waxa lagu kufsaday dugsiga, kaas oo qayb ka ah Xarrunta Agoomaha. Waraysigeedii, Agaasimuhu waxa ay ku doodday in aan Cawo lagu kufsan goob ka–baxsan Xarrunta Agoomaha? Waa halkee halka lagu kufsaday? Sideebay se ku ogaatay goobtaa kale maadaama ay iyadu masuul ka tahay Xarrunta Agoomaha?
- Sida uu sheegayo Cawo Aabbaheed, Xarrunta miyay isku dayeen in ay soo xaadhaan uurkaas iyaga oo aan la tashan aabbaheed ama qaraabada kale?
- Waa maxay sababta ay Xarrunta si joogto ah ugu diideen Cawo Aabbaheed in ay siiyaan fursad uu si gooni ah ula kulmo inantiisa si uu si xor ah ula hadlo una ogaado xaqiiqada wixii dhacay, iyo ragga u geystay kufsigaas?
- Markii ay dhacday in loo ogolaado in uu la hadlo inantiisa, waa maxay sababta Agaasimaha lafteeda, iyo tiro kale oo shaqaalaha ahi ugu adkaysteen in ay goobjoog ahaadaan?
- Waa maxay sababta Agaasimuhu u diidday tallo-soo jeedintii Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka in ay u ogolaato in wiilashu ku noqdaan Xarrunta Agoomaha inta ay CID-du soo gabo-gabaynayso baadhista?
- Maamulka Xarrunta Agoomuhu wax xidhiidh ah ma la sameeyey qoysaska wiilashaas? Waa maxay taageerada ay Xarrunta Agoomuhu u fidinayso wiilashaa kuwaas oo billaa danbi ah illaa lagu caddaynayo in ay danbi galeen?

## *Waa Maxay Sababta Baadhis Madax-Bannaan oo Degdeg ah Loogu Baahan Yahay*

Xaqiiqada wixii ka dhacay Xarrunta Agoomaha, iyo waayaha ay ku sugan yihiin hadda wiilashaa xidhani, lama ogaan karo illaa la helo baadhis dhammaystiran, hufan, oo caddaalad ku sallaysan, oo ay hogaaminayaan koox ka madax-bannaan Xarrunta Agoomaha iyo Wasaaradaha ay su'aaluhu dul hoganayaan. Arrinta la xidhiidha CID-da, *Hay'adda Horizon Institute* waxa ay ugu baaqaysaa Taliyaha Booliska in uu magacaabo saraakiil sare oo khibrad u leh baadhista dambiyada laguna ogyahay karti iyo daacadnimo si ay korka ugala socdaan baadhista.

---

***Hay'adda Horizon** oo ka shaqaysa sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org. Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala soco Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.*